[redacted]


# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad — Muqdisho, 30 Luulyo 1976 — L. 3

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada

**FAAFIN BIL SOO BAXA** — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


## KOOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI


SHARCI L. 3 ee 13 Luulyo 1976. — *Nidaaminta Maamulka Hawlaha Golaha Dhexe ee Xisbiga H.K.S. iyo kan Dawladda* — Bogga 23


———

### BOGGA LABAAD

### XEER


XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 13 Luulyo 1976, L. 11 — *Magacaabid Ku-xigeennada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya* — » 26

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S., 13 Luulyo 1976, L. 12 *Magacaabidda Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed* — » 27



**Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho**

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S., 13 Luulyo 1976, L. 13
*Magacaabid Guddoomiye iyo Ku-xigeen Guddiga Baarista iyo Kormeerka Golaha Dhexe ee Xisbiga H.K.S.* » 28

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S., 13 Luulyo 1976, L. 14
*Magacaabid Guddoomiyayaal Hogaanno iyo Ku-xigeenno Guddoomiyayaal* » 29

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S., 12 Luulyo 1976, L. 15
*Magacaabid Sarkaal loo wakiishay Kharashka Miisaaniyadda Sannadka 1976* » 31

---

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOKLA TOGDHEER EE BURCO

*29 Luulyo 1976, — Lumid Jeegga W. L. 2244 7, Shs. 14,000 uu leeyahay Maxamed Warsame Muumin (1)* » 33

# BOGGA KOWAAD

SHARCI L. 3 ee 13 Luulyo 1976.
Nidaamintа Maamulka Hawlaha Golaha Dhexe ee Xisbiga H.K.S. iyo kan Dawladda.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kaacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarradoodu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 1 Luulyo 1976 ee ku saabsanaayeen Dhisidda iyo la wareegidda xukunka Dalka Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed iyo Habka Hoggaaminta Dalka;

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga fadhigiisii ahaa 3 iyo 12 Luulyo 1976.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Si loo socodsiiyo hawlaha iyo barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed iyo kan Dawladda isla markaasna la qorsheeyo la iskuna duwo shaqooyinkaa ee kala geddisan, waxaa la dhisay Xafiisyo, Guddi iyo Xoggaannada hoos ku tilmaaman:

A) *Xafiisyo*

1. Xafiiska Kaaliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha Madaxtooyada;
2. Xafiiska Kaaliyaha Xoghayaha Xisbiga H.K.S.;
3. Xafiiska Guddiga Baarista iyo Kormeerka ee Golaha Dhexe ee Xisbiga H.K.S.;

B) *Hoggaanno*

1. Hoggaanka Abaabulka
2. Hoggaanka Idiyolojiyada
3. Machadka Siyaasadda.
4. Hoggaanka Gaashaandhigga.
5. Hoggaanka Nabadgelyada.
6. Hoggaanka Arrimaha Dibadda.

7. Hoggaanka Maamulka Arrimaha Golaha Dhexe.
8. Hoggaanka Danwadaagaha iyo Beeraha Deddegga.
9. Hoggaanka Shuruucda iyo Caddaaladda.
10. Hoggaanka Iskaashatooyinka.
11. Hoggaanka Tacliinta, Barbaarinta iyo Cayaaraha.
12. Hoggaanka Maaliyadda Xisbiga.
13. Hoggaanka Caafimaadka iyo Xannaanada Dadka.
14. Hoggaanka Cilmi Baridda.
15. Hoggaanka Maaliyadda iyo Ganacsiga.
16. Hoggaanka Sancada.
17. Hoggaanka Xoolaha iyo Beeraha.

Qodobka 2aad

1. Xafiisyada, Guddiga iyo Hoggaannada waxaa ka madax iyo mas'uul noqon doona dad ka tirsan Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed:

i) Xafiisyada waxaa ka mas'uul noqon doona Kaaliyayaal;

ii) Guddiga iyo Hoggaannada waxaa ka mas'uul noqon doona Guddoomiyayaal.

2. Jaallayaasha loo dhiibay mas'uuliyadda Xisbiga iyo kan Dawladda, waxaa lagu magacaabayaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya isagoo tixgelinaaya go'aanka Golaha Dhexe ee Xisbiga.

Qodobka 3aad

1. Ujeeddooyinka dhismaha Xafiisyada, Guddiga iyo Hoggaannada loo dhisay waa:

b) In ay darsaan, qorsheeyaan, jaangooyaan Maamulka dalka xagga Siyaasadda, Dhaqaalaha, Bulshada iyo Nabadgelyada;

t) In ay si cilmi ah u darsaan hirgeliyaanna Mabaadi'da Hantiwadaagga ee Xisbiga.

j) In ay ilaaliyaan tixgeliyaanna Sharciyada dalka u dhigan fuliyaanna go'aannada Golaha Dhexe ee Xisbiga.

2. Guddiga iyo Hoggaannada Sharcigan lagu tilmaamay waxay ku shaqayn doonaan habka wada tashiga wadareed.

Qodobka 4aad

Hawlaha gaar ahaan ay qaban doonaan Guddiga Baarista iyo Kormeerka iyo Hoggaannada uu ka kooban yahay Xisbiga waxaa lagu soo saari doonaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha ahna Xoghayaha Xisbiga isagoo tixgelinaaya go'aanka Golaha Dhexe ee Xisbiga.

Qodobka 5aad

1. Xubnaha lagu tilmaamay qod. 1aad ee Sharcigan haddii laga reebo Xafiisyada Kaaliyayaasha, waxay yeelanayaan Ku-xigeenno Guddoomiye.

Qodobka 6aad

Guddiga iyo Hoggaannada Sharcigan lagu xusay waa in ay u soo gudbiyaan Xoghayaha Xisbiga warbixin saameyneysa hawshooda oo qoraal ah 15 (shan iyo toban) maalmood ka hor inta fadhiga caadiga ah ee Xisbiga aan la qaban.

Qodobka 7aad

Madaxweynuhu isagoo dhegeystay mas'uuliinta xubnaha uu ka kooban yahay Xisbiga wuxuu soo saari' doonaa Xeerar hoose ee lagu faahfaahinaayo sharcigan.

Qodobka 8aad

Sharcigan wuxuu dhanqan galayaa 3 Luulyo 1976.
Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 Luulyo 1976.

MADAXWEYNAHA J. D. S.
*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*

# BOGGA LABAAD

XEER L. 11 ee 13 Luulyo 1976.
*Magaciibid Ku-xigeennada Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya*

## MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarkoodu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo bexeen 1 Luulyo 1976 kuna saabsanaa Dhisidda iyo la wareegidda Xukunka dalka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Habka Hoggaamintа dalka;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 1 ee 1 Luulyo 1976 kuna saabsanaa Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga H.K.S. ee fadhigiisu ahaa 11 Luulyo 1976.

## WUXUU XEERAYAA

### Qodobka 1aad

Jaallayaasha ka tirsan Golaha Dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Siyaasadda ee magacyadooda hoos ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay jagada Madaxweyne Ku-xigeen, sida soo socota:

1. Jaalle S. Guud Maxamed Cali Samantar

   Ku-xigeenka Kowaad ee Madaxweynaha.

2. Jaalle S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax

   Ku-xigeenka Labaad ee Madaxweynaha.

3. Jaalle S. Guuto Ismaaciil Cali Abokor

   Ku-xigeenka Saddexaad ee Madaxweynaha.

### Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa 11 Luulyo 1976 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 Luuylo 1976.

MADAXWEYNAHA J. D. S.
*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*

XEER L. 12 ee 13 Luulyo 1976.

Magacaabidda Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee Xisbiga H.K.S.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. 17, 18 iyo 19aad ee soo baxeen 1 Luulyo 1976 kuna saabsanaayeen Dhisidda Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed iyo habka Hoggaaminta Dalka;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 2 ee soo baxay 3 Luulyo 1976 kuna saabsanaa Nidaamka Hawlaha Golaha Dhexe ee Xisbiga H.K.S. iyo sharciga lamb. 1 e 1.7.1976 oo la xiriiray doorashada Xoghayaha Guud ee X.H.K.S. isla markaasna ah Madaxweynaha J.D.S. iyo Guddoomiyaha Golaha Wasaarada.

ISAGOO TIXGELINAAYA Goaankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga fadhigiisuna ahaa 3 Luulyo 1976.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

In Jaalle S. Guuto Ismaaciil Cai Abokor loo magacaabay Kaaliyaha Xoghayaha Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee X.H.K.S. waxaa loo xilsaaray inuu:

1. Kala taliyo Xoghayaha Guud ee X.H.K.S. arrimaha Xisbiga;
2. Xiriiriyo hawlaha Hoggaannada Xisbiga iyo Xoghayaha Guud ee Xisbiga;
3. Qabto oo fuliyo hadba hawshii khaas ahaan ee Xoghayaha Guud ee Xisbigu u dhiibo.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa 3 Luulyo 1976 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 Luuylo 1976.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*

XEER L. 13 ee 13 Luulyo 1976.

Magacabid Guddoomiye iyo Ku-xigeen Guddiga Baarista iyo Kormeerka Golaha Dhexe ee Xisbiga H.K.S.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. 17, 18 iyo 19aad ee soo baxeen 1 Luulyo 1976 kuna saabsanaayeen Dhisidda Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed iyo habka hoggaaminta dalka;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 2 ee soo baxay 3 Luulyo 1976 kuna saabsanaa Nidaaminta Hawlaha Golaha Dhexe ee Xisbiga H.K.S. iyo sharciga lamb. 1 ee 1.7.1976 oo la xiriiray doorashada Xoghayaha Guud ee X.H.K.S., isla markaasna ah Madaxweynaha J.D.S. iyo Guddoomiyaha Golaha Wasaaradaha;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga fadhigiisuna ahaa 3 Luulyo 1976.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran yihiin kana tirsan Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waxaa lagu magacaabay jagada mid waliba ku horyaal:

1. Jaalle G. Sare Cabdulqaadir Xaaji Maxamed

   Guddoomiyaha Guddiga Baarista iyo Kormeerka ee Golaha Dhexe.

2. Jaalle Cabdullaahi Maxamed Xasan
   Ku-xigeenka Guddoomiyaha Guddiga Baarista iyo Kormeerka ee Golaha Dhexe.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 3.7.1976 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 3 Luulyo 1976.

MADAXWEYNAHA J. D. S.
*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*

XEER L. 14 ee 13 Luulyo 1976.

Magacabid Guddoomiyayaal Hoggaanno iyo Ku-xigeenno Guddoomiyayaal.

MADAXWEYNAHA

ISAGO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarradoodu yihiin 17, 18 iyo 19 ee 1 Luulyo 1976 ee Dhisidda iyo la wareegidda Xakunka dalka Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 2 oo soo baxay 3 Luulyo 1976 kuna saabsanaa nidaamka hawlaha Golaha Dhexe ee Xisbiga H.K.S. iyo Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1.7.1976 lana xiriiray doorashada Xoghayaha Guud oo isla markaasna ah Madaxweynaha J.D.S. iyo Guddoomiyaha Golaha Wasaarada;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga fadhigiisuna ahaa 3 Luulyo 1976 iyo 11 Luulyo 1976.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran yihiin kana tirsan Golaha Dhexe ee X.H.K.S., waxaa loo dhiibay mas'uuliyadda Hoggaannada ay ku agyaalliin magacyadooda iyagoo - mid walba - uu ka noqon doono Guddoomiye Hoggaan ama Ku-xigeen Guddoomiye sida hoos ku tilmaaman:

1. Jaalle Cumar Salaad
   Guddoomiye Hoggaanka Abaabulka;
2. Jaalle Faaduma Cumar Xaashi
   Ku-xigeen qaabbilsan L/Haweenka;
3. Jaalle Maxamed Aadan Maxamuud
   Guddoomiye H. Ideolojiyada;
4. Jaalle Maxamuud Cabdi Dhuunkaal
   Ku-xigeen Guddoomiye H. Ideolojiyada;
5. Jaalle G. Sare Axmed Maxamuud Faarax
   Guddoomiye Machadka Siyaasadda;
6. Jaalle Maxamed Jaamac Xaaji
   Kore-Ku-Xigeen Guddoomiye H. Machadka Siyaasadda;

7. Jaalle G. Sare Maxamed Cumar Jees
Guddoomiye H. Gaashaandhigga;
8. *Jaalle Dhammie Xamsa Maxamed*
Guddoomiye H. Nabadgelyada;
9. Jaalle Cabdiraxmaan Ceydiid
H. Arrimaha Dibedda;
10. Jaalle Warsame Cali Faarax
Ku-xigeen Guddoomiye H. Arrimaha Dibadda;
11. Jaalle Ibraahim Meygaag Samantar
H. Maamulka Arrimaha Golaha Dhexe ee Xisbiga;
12. Jaalle G. Sare Axmed Xasan Muuse
Guddoomiye H. Danwadaagaha iyo Beeraha Degdegga;
13. Jaalle Maxamed Cali Warsame
Ku-xigeen Guddoomiye Danwadaagta iyo Beeraha Degdegga;
14. Jaalle Cumar Saalax Axmed
Ku-xigeen Guddoomiye Danwadaagta iyo Beer. Degdegga;
15. Jaalle Maxamuud Cali Axmed
Guddoomiye H. Shuruucda iyo Caddaaladda;
16. Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud
Guddoomiye H. Maaliyadda iyo Ganacsiga;
17. Jaalle Warsame Cabdullaahi Cali
Guddoomiye H. Iskaashatooyinka;
18. Jaalle G. Sare Cismaan Maxamed Jeelle
Guddoomiye H. Maaliyadda Xisbiga;
19. Jaalle G. Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar
Guddoomiye H. Tacliinta, Barbaarinta iyo Ciyaaraha;
20. S. Guuto Cali Mataan Xaashi
Guddoomiye H. Caafimaadka iyo Xannaanada Dadka;
21. Jaalle Maxamed Cali Nuur
Ku-xigeen Guddoomiye H. Caaf. iyo Xannaanada Dadka;

22. Jaalle Shariif Saalax Maxamed

Guddoomiye H. Cilmiga Baaridda;

23. Jaalle Axmed Xabiib Axmed

Guddoomiye H. Sancada;

24. Jaalle Axmed Maxamed Ducaale

Guddoomiye H. Xoolaha iyo Beeraha;

Qodobka 2aad

Guddoomiyayaasha Hoggaannada iyo Ku-xigeennada Guddoomiyayaasha Hoggaannada, waxay yeelanayaan gunno xilka iyo mas'uuliyadda loo dhiibay laguna magacaabay.

Gunnada xilka iyo wixii xuquuq kale ee raacsan waxaa lagu xaddidi doonaa go'aan ka soo fuli doona Golaha Siyaasadda ee Xisbiga.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa 3 Luuylo 1976 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 Luulyo 1976.

MADAXWEYNAHA J. D. S.
*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*

---

**XEER L. 15 ee 12 Luulyo 1976.**

**Magacaabid Sarkaal loo wakiishay Kharashka Miisaaniyadda Sannadka 76.**

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY: Xaashidii Kowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969, iyo Sharcigii kowaad ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Dekereetada sharciga ee soo baxday 29kii Disembar 1961, L. 2, Amarka Maamulka Xisaabaadka;

ISAGOO ARKAY: D.P.R. 20 Maarso 1965, L. 13, Xeerka Nidaaminta iyo Abaabulidda Xeerka joogtada ah ee ku saabsanaa Madaxtooyadii hore ee Golaha Wasaarada iyo Xafiisyada la xiriiray iyo wixii beddelaad galay;

MARKII UU GAREYSTAY: In loo baahan yahay sarkaal shaqaale ah in si ku meel gaar ahaan ah loo wakiisho maamulka lacagta Madaxtooyada Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo dhammaan xubnaha kala duwan ee raacsan: Agaasimayaasha Guud, Xafiisyada iyo qaybaha maamulka ee lagu tilmaamay sharcigii lambrkiisu ahaa 1 (kow) taariikhdiisuna ahayd 4.1.1968, ayadoo uu siinayo awood maamulidda qardaysiga ku tala gelidda kharashka shaqa socodsiinta, isku-duwidda iyo soo bandhigidda xisaabaadka la garaysan karo kuna saabsan qardada (soo hormarin la sameeyo, oggolaashada rukhsadda safarka dibedda iyo gudaha.

DEKEREETA

Qodobka 1aad

Sarkaalka la yiraahdo Jaalle Cali Cabdalla Cumar «Dacmiin», darajc B7, Agaasimaha Waaxda Maamulka Lacagta M.J.D.S. (KMG), waxaa luga magacaabay Sarkaal Wakiileed kharajka Miisaaniyadda sannadka ee Lacagta Madaxtooyada J.D.S. iyo xubnaha raacsan ee kor lagu soo xusay, ka bilaabato 12-Luulyo 1976, sababtoo ah in sarkaalkii hore ee lagu magacaabay Dekereetada lambarkeedu yahay 000819/76 ee 12.2.1976, oo caafimaad darro awgeed la gartay in la magacaabo sarkaalka cusub ee kor ku qoran.

Dekereetadanu waxay dhaqan galaysaa haddadatan, isla markaana waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho; 12 Luulyo 1976

MADAXWEYNAHA J. D. S.
*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 4 bogga lamb. 65*
*Muqdisho, 14 Luulyo 1976.*
*Hantidhawrka Guud*
G.le Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

### MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER EE BURCO

### BANKIGA GANACSIGA UMMADDA (Laanta Burco)

*XUKUN*

MARKII AAN ARKAY: Arjiga Dacwoode Jaalle Maxamed Warsame Muumin oo sheegtay in laga xaday Buuggii Kaydsiga ee lambarkiisu yahay 2244/7 kuna qorneyd lacag dhan Shs. So. 14.000 oo ka soo baxday Bankiga Ganacsiga Ummadda (Burco).

MARKII AAN ARKAY: Warqadda sammaddeedu tahay 00960 oo ka timid Bankiga Ganacsiga Ummadda, laanta Burco oo ay hubiyeen in buuggaasu jiro.

MARKII AAN HUBIYEY: In Dacwoode dooddiisi run tahay, isla markaasna aan arkay Qod. 27 ee Xeerka lambarkiisu yahay 2 soona baxay 9.9.1965, ayaan guddoonshay in buugga lambarkiisu yahay 2244/7 la bi'iyo, Bankiga Ganacsiguna u celiyo Jaalle Maxamed Warsame Muumin lacagtaas ku qornayd Buugga Keydka, 30 casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah, kharashkana dacwaduhu iska bixiyo.

Burco, 29 Luulyo 1976.

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER (Burco)
*(Dr. Cabduraxmaan X. Maxamuud Ereg)*

*(1)*